

Hawsha:

In la horumariyo waxbarashada farshaxanka- ee isku dhafan oo dadka barta ixtiraamka iyo qadarinta iyada oo la horumarinayo madaxa, wadnaha, iyo gacmaha carruurta ka soo jeeda dhammaan xaaladaha iyo dhaqamada kala duwan.

PVS qofna takoori mayso iyadoo ay la xiriirto jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, caqiiqada, lab ama dheddig, qowmiyadda, dookha galmo, naafanimada maskaxeed ama jireed, da'da, da'ada, halka aad asal ahaan laga soo jeedo, awoodda dhanka ciyaareed, baahiyaha gaarka ah, Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee loo leeyahay, ama guusha tacliimeed.



Portland Village School
7654 N Delaware Ave.
Portland, OR 97217
Phone: 503-445-0056
Fax: 503-445-0058
E-mail: info@portlandvillageschool.org

Ku soo dhowow Dugsiga Dadweynaha Madaxa bannaan ee Village ee Portland



Ms. Poetsch's class - wall hanging

Portland Village School
7654 N Delaware Ave.
Portland, OR 97217
503-445-0056
info@portlandvillageschool.org
www.portlandvillageschool.org



XAQIIQOOYIN DEGDEGA AH:

- Waxaa la furay 2007
- Wuxuu u adeegayaa fasallada K-8
- Waldorf ay dhiirigelisay
- Muusik, Farshaxan iyo Farsamada Gacanta oo loogu talagalay dhammaan fasallada

Ma daneynaysaa in aad isqorto?

Fadlan wac 503-257-3936
wixii macluumaad ah.

Macluumaadka

Marka la joogo Dugsiga Village ee Portland, waxaanu wax barnaa ilmaha oo idil. Waxaan jecel nahay in aan dhahno waxaan wax barnaa "madaxa, wadnaha iyo gacmaha" iyada oo la xannaanaynayo ardayda koritaankooda garasho, jireed, iyo dareen.

Waxyaabaha tacliinteeda ugu muhiimsani waa ka dhigida mid xiiso leh iyada oo la isticmaalayo muusik iyo heeso, farshaxan, riwaayad, luqad labaad, xirfadaha nolosha iyo shaqo gacmeedka. Manhankan dhammeystiran wuxuu ardayda u diyaariyaa in ay buuxiyaan caqabadaha dugsiga iyo nolosha iyaga oo ah kuwo miro-dhal ah iyo bani'aadam isku dhafan. Waanu ku faraxsanahay in aanu carruurta iyo qoysaska kala duwan ee Portland siino waxbarashadan bedelka ah ee dhammeystiran, ee la xaqiijiy.

Waa maxay dugsiga madaxa bannaani?

Dugsiyada madaxa bannaan waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagay in ay bixiyaan barnaamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaalooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiga dadweynaha. Dugsiyada madaxa bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiga madax bannaan waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 338.

Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dugsiyada madaxa bannaan iyo PSS?

PPS ayaa ka mas'uul ah kor kala socoshada iyo kormeerka dhammaan dugsiyada madaxa bannaan ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisaa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonaada maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiga madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciga iyo heshiiska.

Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiga madaxa bannaan?

Isqorista dugsiga madaxa bannaan waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaana laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasal ee ardayga, iyo booska bannaan ee jira. Haddii dugsiga madaxa bannaani uu helo codsiyo ka badan booska bannaan ee jira marka la eego heerka fasalka/fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.

